



! Isbeddelada taakuleynada shaqo la'aanta

Taakuleynta guud ayaa beddelaysa taakuleynada shaqo la'aanta ee Kela-da

Taakuleynta shaqo la'aanta iyo taakuleynta aasaasiga ah ee maalinlaha ah waa la joojinayaa 1.5.2026.

Kela-da ayaa isla markaas bilaabaysa inay dadka shaqo la'aanta ah siiso taakuleynta guud. Uma baahna macaamiilku inuu Kela-da ula soo xidhiidho isbeddelkaas.

Taakuleynada shaqo la'aanta ee Kela-da ee ah lacagta shaqo la'aanta iyo taakuleynta aasaasiga ah ee maalinlaha ah waa la joojinayaa. Waxaa lagu beddelayaa taakuleynta guud oo ah mid cusub.

Haddii aad hesho taakuleynta aasaasiga ah ee maalinlaha ah ama taakuleynta shaqo la'aanta ah, Kela-da ayaa bilaabaysa inay ku siiso taakuleynta guud bisha Maajo ee 2026-da.

Isbeddelkaasi waa mid si automaatig ah u dhacaya, taas macnaheedu waxa weeyaan inaad u baahnayn inaad la soo xidhiidho Kela-da.

Wargelinta muddada shaqo la'aanta sidii hore si lamid ah ayaad wali uga sii buuxinaysaa Kela-da 4-tii toddobaadba mar.

Cadadka taakuleynta guud

Taakuleynta guud waa 37,21 yuuro maalintii, waxaanad helayso shan maalmood oo toddobaadka ka mid ah. Taas macnaheedu waxa weeyaan taakuleynta guud waxaay le'eegtahay taakuleynta shaqo la'aanta iyo taakuleynta aasaasiga ah ee maalinlaha ah.

Dakhliga ayaa saameynaya taakuleynta guud


Dakhligaaga oo dhan ayaa yarayn kara cadadka aad ka helayso taakuleynta guud. Kela-da ayaa baadhaysa in dakhli aad leedahay. Markaas kaddib ayaay Kela-du kula soo xidhiidhaysaa, haddii arrintaasi ay daruuri tahay.

Haddii aad shaqo la'aan noqoto

Taakuleynta guud waxaa laga codsan karaa OmaKela 1.5.2026 laga bilaabo. Haddii shaqo la'aantu ay sii socoto, ilaali in codsashadaada shaqada ee adeegyada shaqaalaysiintu uu yahay mid kuu shaqeynaya waxaanad OmaKela ku buuxisaa wargelinta muddada shaqo la'aanta 4-tii toddobaadba mar.

Sawirka hoos ku yaalla ayaad ka arki kartaa, waxa ay tahay inaad sameeyso, haddii aad shaqo la'aan noqoto.

Bilowga shaqo la'aantaada sidan yeel



Faahfaahin dheeraad ah ka akhriso:

<http://www.kela.fi/general-social-security-benefit>
(ku qoran af ingiriis).

Kela[®]